

Arbaco 28-ka Ogosto 2024

Waalidiinta iyo daryeelayaasha qiimaha leh

Re: \$400 Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus)

Qoysasku waxay markasta u doonayaan caruurtooda waxa wanagsan. Laakin qiimaha nolosha ee hadda jira - lebbiska, kaamamka, ciyaaraha iyo waxyaabo kale oo badan - waxaas oo dhan marka la isku daro waa kharash.

Taasi waa sababta ay Dowladda Allan Labour ay nolosha ugu fududaynayso qoysaska, iyadoo siinaysa \$400 oo ah Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) taas oo ah wax hal mar keliya la bixiyo.

Ardayda dugsiyada aan dowliga ahayn dhigta ee sanadka 2025 ku jiri doona u diyaargarowga (Prep) ilaa sanadka 12, ee hela waxyaabaha faaiidadeeda la soo tijaabiyay ee [kaamamka, Ciyaaraha iyo dalxiiska](#) (Camps, Sports and Excursions Fund - CSEF), waxay xaq u leeyihiin Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus).

Waalidiinta iyo daryeelayaashu uma baahna inay codsadaan, maadaama Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) la siinayo ardayda xaqa u leh ee dhigata dugsiyada aan dawliga ahayn laga bilaabo dabayaaqada Nofeembar 2024.

\$400 Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) ayaa loo heli karaa caruurta oo dhan. Taas macneheedu waxa weeye qoyska xaqa u leh ee ay u joogaan saddex carruur ah oo da' dugsiyeedka gaaray waxay heli doonaan wadar ahaan \$1,200.

Muhiimadu waxay tahay, Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) ayaa la heli karaa iyadoo ay u sii dheertahay maalgelinta Kaamamka, Ciyaaraha iyo dalxiiska.

Si aad wax badan uga ogaato Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus), kala hadal dugsiyaga sida deeqdan loogu talagalay inay dhinto qiimaha nolosha ay adiga kuu saameynayso.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) waxa kale oo laga heli karaa vic.gov.au/school-saving-bonus.

Dhamaanteen waxaanu leenahay qoysaskiina - nasiib wacan sannad dugsiyeedka 2025.

Mahadsanid,

Mudane. Jacinta Allan
Premier of Victoria
Hooyo laba caruur ah dhashay

Mudane. Xildhibaan Ben Carroll
Ku-xigeenka koowaad
Wasiirka waxbarashada